

Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 59aad ee 29ka Maarso 2023 – Wasaaradda Maaliyadda

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda (Guddiga) waxuu ka hadlay talo bixin qoraal ah oo ku saabsan hortabinada dib-uga-gorgortamidda heshiiska wax soo saar wadaaga ee lala galay shirkadda Coastline. Talo bixintaan ayaa tilmaamaysa qodobbada lagu taliyay in dib looga wadahadlo ee ku jira heshiiska wax soo saar wadaaga ee Coastaline. Talo bixintaan ayaa soo jeedisay in la sameeyo koox ka socota heyadaha kala duwan ee dowladda si ay si wanaagsan isugu duwaan geeddi-socodka arrintaan. Go'aannada ku saabsan habka loo maareynayo arrintaan waxaa hagi doona jawaab-celinta laga helo wada-hadallada hoggaanka dalka iyo Wasiirka Batroolka.

Heshiiyada iyo Qandaraasyada Guud: Maareeyaha Guud ee Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed (SCAA) ayaa ka warbixiyey qorshaha SCAA ee ku aaddan kordhinta khidmadaha duulista hawada Soomaaliya taas oo sabab u ah sare uga qaadidda tayada hawada Soomaaliya heerka G lana gaarsiiyay heerka A. Dib-u-eegistaan ayaa keeni doonta koror la taaban karo oo ku yimaada dakhliga Dowladda Federaalka ee ka imaanaya waaxda duulista. Guddiga ayaa u riyaaqay hagaajinta tayada hawada Soomaaliya, waxuuna xasuusisay SCAA in dhammaan dakhliga duulista hawada ka soo xarooda lagu shubo Khasnadda guud ee Dowladda, sida uu dhigayo Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud. Guddiga waxuu sii waddaa dib u eegista iyo ka talo bixinta ururinta tartanka furan ee adeegga ururinta deymaha maqan ee ay soo jeedisay heyadda SCAA.

Guddiga waxuu ka hadlay halka ay marayaan tiro ka mid ah heshiisyada iyo qandaraasyo ay ka mid yihiin (Raashinka iyo Saadka Ciidanka Xoogga, heshiiska tayo dhowrka waxyaabaha la soo dhoofiyo, kordhinta heshiiska adeega dal-ku-galka, heshiiska adeega baasaboorka, adeega dukumentiga alaabada elektiroonigga ah iyo kuwa kale). Guddiga ayaa xusay in nidaamka wax soo iibsiga saxda ah aan loo marin qeyb ka mid heshiisyada, waxuuna ku taliyay in la soo saaro wareegto, lagu xasuusinayo dhammaan wasaaradaha waajibaadkooda ku aaddan sharciga iibka.

FGC waxa kale oo ay ogolaatay in ay ka caawiso Waaxda libka si ay u horumariso hab-shaqeedka joogtada ah ee Guddiga Heshiisyada ee heer Wasiir (IMCC).

Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa shirka uga warbixiyay qorshahooda ku aaddan in golaha wasiirrada ay u gudbiyaan hindise-sharciyeedka Lacag-bixinta Qaranka, Hindise-sharciyeedka Caymiska, iyo Hindise-sharciyeedka Hay'adaha Maaliyadda ayagoo kaashanaya Wasaaradda Maaliyadda. Guddiga waxuu ugu hambalyeysay Bangiga Dhexe, ku biirista Soomaaliya diiwaanka IBAN, kaa oo hormarinaya habka isku dirida lacagaha. Guddiga waxuu ka shaqaynaysaa qoraal talo bixin ah oo ku saabsan dib-u-habaynta Bangiga Dhexe iyo Maaliyadda si loo milicsado horumarka Bangiga iyo casharrada laga bartay.